

# CAAFIMAADKA

Ku caawimeysa dhibbanayaasha colaada hubeysan iyo masiibooyinka iyadoo u hagaajineyo helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah.

## KU TABABARIDA SHAQAALAHISA BITAALKA HABKA XILGUDASHADA UGU HABBOON EE WAAXDA QALIINKA



©Pedram Yazdi/ICRC

Rita Agbemenu oo shaqaalaha u sharaxeya habka alaabta Waaxda Qaliinka loogu hayo xaalad jeermis aan laheyn

*"Si fican oo waqtiga loo adeegsado wuxuu waqtiga xitaa ka dhigaya mid aad qalli u ah"*  
Jean-Jacques Rousseau

Waqtigu waa wax qalli ah. Kana sii qaalsinan, markay tahay gudaha waaxda qaliinka (OT) halkaas oo ilbiriqsi kasta ay sameyn kartofarqi u dhaxxeeyaa nolol ama geeri. Sameynta waxqabadka ku habboon waaxda qaliinka waxay ku caawisaa xakameynta caabuqa iyo waqtiga oo si fiican looga faaideysto. Waa muhim in shaqaalaha isbitaalka ay la qabsadaan hababka si awood ugu yeeshaan in si fiican ugu adeegaan bulshooyinkooda.

Rita Agbemenu oo 37 jir ah waa kalkaaliso caafimaad dhanka qaliinka oo ka timid Jenefa, waxay dhisatay mihnad oo ay qolka qaliinka ka soo shaqeneysay in ka badan 12 sano. Fadhigeedu waa Isbitaalka Militeriga 37aad ee magaalada Accra, Ghana, laakiin

lixdii bilood dambe ee dhowaa 2014kii ayey la shaqeneysay ICRC, Koofurta Suudaan. Xilligii ku gudajirtay hawsheeda ee wadanka kaas oo la dhadhacayey colaadii 18 billood ee la soo dhaafay, ayaa waxay tiro qaliimo ah ku caawisay dhibbanayaasha qaba dhaawacayada hubka.

Bishii Abriil sanadkan, ka dib dhameystirkii hawshii dayactirka meelaha ay ku yaaliin qolalka waaxda qaliinka iyo dhismooyinka isbitaalka, ergada ICRC Soomaaliya ayaa qoratay Rita si aqooneteeda ula wadaagaan shaqaalaha qaliinka ee Isbitaalada Kismaayo iyo Baydhabo. Barnaamijka tababarka waxaa looga dan leeyahay in lagu hagaajiyo hufnaanta qaliimada iyo daryeel haboon

loo fidyo bukaanada xoogana la saarayo xakameynta caabuqa.

"Waxaan dhammeystirnay habsami u socodka shaqada qeybaha kala duwan ee waaxda qaliinka, taasi waa qaliinka, qolalka bogsashada iyo sterilisaashinka. Sterilisaashinka si ballaaran ayaa loo dhammeeyey iyo nadaafad wanaagsan iyo farsamooyinka gacmo dhaqa ayaa xoogga la saaray. Waxaan kaloo ka shaqeyney maareynta shaqaalaha waaxda qaliinka, kaltanka iyo guud ahaan hagaajinta habsami u socodka shaqada," Rita ayaa sidaa sharaxday.

Tababarka gacan-ku qabadka ah wuxuu socday lix todobaad badanaa waxaa qeyb ka ahaa casharo baraatiiko ah laguna dhex sameynayey waaxda qaliinka halkaas oo shaqaalaha sameeyey hawlqabad baraatiiko ah ku saabsan waaxda qaliinka.

Rita hawsheeda 6 da todobaad ahaa, waxayna tababartay wadar ahaan 25 shaqaale qaliin. Waxay ku mahadcelisay iskaashiga weyn iyo taageerada shaqaalaha iyo maamulka isbitaalka. xirfadahan cusub iyo hababkan oo la haysto, iyada kalsooni ayey qabta, isbitaaladu meel fiican oo ay ugu adeegi karaan bulshadooda ayey joogaan.

Marka la isku daro, labada isbitaalka waxay sameeyeen in ka badan 600 qaliin tan iyo bilowgii sanadkan.

Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ICRC-da Soomaaliya booqo  
[www.blogs.icrc.org/somalia/so](http://www.blogs.icrc.org/somalia/so)

Email: [sok\\_somaliblog\\_services@icrc.org](mailto:sok_somaliblog_services@icrc.org)